# LIISKA SUGITAANKA QORITUURKA DEGGANAHA EE PPS
# SU'AALAHA BADANKA LA ISWAYDIIYO

**Waa maxay liiska sugitaanka qorituurku?**
Galitaanka barnaamijyada PPS ee khaaska ah badankooda waxa lagu helaa qorituur sanadle ah. Hadday jiraan dalbadayaal qorituur oo ka badan inta loo baahan yahay, ardayda aan helin bandhigid waxa lagu daraa mid ama ka badan liisaska sugitaanka. Kadib marka qorituurku dhammaado, dalbadayaasha cusub sidoo kale waxa lagu dari karaa liiska sugitaanka.

**Muddo intee leeg ayuu liiska sugitaanku jirayaa?**
Liisaska sugitaanku waxay furan yihiin ilaa dhammaadka Sibtambar dugsiyada badankooda. Liisaska sugitaanka ee barnaamijyada baddiilka ah iyo doorashada dugsiyo kale waxa dhici karta inay furnaadaan kadib Sibtambar.

**Sideen ku heli karaa liiska sugitaanka ardaygayga?**
Liistada sugayaasha waxay si weyn isku bedelaysaa marka ka dib la soo saaro natiijooyinka qorituurka sidoo kalena ay qoysaska qaar ka mid ahina ay diidaan natiijada la siiyey, sidaas darteed faahfaahinta liistada sugayaasha lama helayo isla markiiba. Laga bilaabo bisha Maayo 29keeda, waxaad heli doontaa koodh gaar ah iyada oo laga yaabo inaad geli karto Liistada Sugayasha adiga oo ka helaya pps.net/schoolchoice. Waxaad sidoo kale suurtagal ah inaad la xiriirto Xarunta Bedelka iyo Isdiiwaangalinta laga bilowga bisha Maayo 29, 2024 sidii aad u ogaan lahayd booska ardaygaaga kaga jiro liista sugayaasha. Fadlan ha kala xiriirin codsigaaga liistada sugayaasha dugsigaaga, sababtoo ah dugsigu ma hayo wax macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan liistadaa sugayaasha.

**Sidee sida la iskugu xigo liiska sugitaanka loo go'aamiyaa?**
Mudnaanaha qorituurka waxa lagu faahfaahiyey siyaasadda PPS ee 4.10.051, sidoo kale lagu go'aamiyaa sida la iskugu xigo liiska sugitaanka.

- Mudnaanta koowaad waxa la siiyaa ardayda ugu qalma in walaalahood dugsiga dhigtaan dugsiyada manhajka gaarka leh iyo barnaamijyada waxbarashada lagu qaato labada luqadood .
- Barnaamijyada badankooda, ardayda buuxiya tilmaamaha mutaysiga ee dakhliga ayaa sidoo kale hela mudnaanta qorituurka. U qalmida dakhliga waxaa mudnaanta koowaad la siiyaa Xarunta Barashada Metroplitan iyo Akademiyada ACCESS.
- Dalbadayaasha soo hara waxa lagu qoraa kuraasta bannaan ama liiska sugitaanka iyadoo la isticmaalayo lambar si nasiib ah loo soosaaray iyo mudnaan yar oo la siiyo sinnaanta jinsiga.

**Miyuu lambarka sugitaanka ardaygaygu isbaddali doonaa?**
Haddii ay kuraas bannaan soo haraan marka qorituurku dhammaado, waxa la dooran doonaa ardayda liiska sugitaanka ugu sarreeya. In kastoo ardaygaagu uu sare u soo kici karo liiska sugitaanka, sidoo kale hoos ayuu u dhici karaa haddii arday cusub liiska lagu soo daro kuwaasi

oo mudnaan sare lahaa qorituurka (sida walaalaha ama ardayda ugu qalma dakhli ahaan). Muhiimad dheeraad ah waxa dhici karta in la siiyo ardayda leh duruufo gooni ah oo la xaqiijiyey.

**Waa maxay duruufaha gaarka ah ee liiska sugitaanka?**
Duruufaha gaarka ah ee liiska sugitaanka waa xaalad degdegga ah oo leh walaacyo caafimaad, badbaado ama waxbarasho oo halis ah oo ku aaddan ardayga. Duruufaha gaarka ah waa inay xaqiijiyaan Enrollment and Transfer Center.

Tusaale ahaan, ardayga la qoray dugsi farsamo oo sare ee gobol kale, ee haddeer u soo guuray Portland wuu u qalmi karaa maadaama uu leeyahay duruufo gooni ah ee galitaanka sanadka dhexdiisa ee Benson Polytechnic HS. Sidoo kale, ardayda ah qaar luuqadda u dhashay ee codsanaya inay galaan ama ku sii jiraan barnaamijyada labada luuqadood waxay ugu qalmi karaan inay ku jiraan duruufaha gaarka ah.

Hase yeeshee, sababaha sida aaditaanka dugsiga saaxiibada ama ka niyadjabidda helitaan la'aanta qorituurka ma noqdaan qaar ardayga loogu xisaabin karo duruufo gooni ah.

**Sidee ayaan ugu codsan karaa duruufaha gaarka ah ardaygayga?**
Haddaad dalbato muddada qorituurku socdo oo aad rabto inaad macluumaadka duruufaha gaarka ah ku darto dalabka qorituurka si loo eego, fadlan iimeyl u dir enrollment-office@pps.net, oo ku qor magaca iyo taariikhda dhalashada ardaygaaga.

Haddaad ku dalbatay qorituunka laakiin aadan ku darin macluumaadka duruufaha gaarka ah wakhtigaas, fadlan buuxi foomkan.

Haddii aadan wali dalban baddal, waxaad gudbin kartaa dalabka qoritaan furan, oo ay ku jiraan macluumaadka duruufaha gaarka ah, laga bilaabo bisha Maayo 29,2024.

**Sidee loo go'aamiyaa duruufaha gaarka ah ee liiska sugitaanka?**
Shaqaalaha Enrollment and Transfer Center ayaa dib u eega codsiyada, marka ay kala tashadaan shaqaalaha dugsiga halkii looga maarmi waayo. Qoysaska waxa lagu wargeliyaa haddii ardaygu u qalmo mudnaanaha liiska sugitaanka, caadi ahaan 1-3 toddobaad gudahood. Haddii codsi la diido, qoysasku waxay helaan macluumaad ku saabsan sida go'aanka rafcaan looga qaato.

**Wax badan ka baro mudnaanaha qoritaanka halkan https://www.pps.net/Page/10521.**

**Faahfaahinta Liiska Sugitaanka iyo Qoritaanka Furan, ka socda Amarka Maamuleed 4.10.054-AD:**
II(3)(a): Codsiyada baddalka qorituurka waxa muhiim ah in la gudbiyo inta ka horraysa wakhtiga ugu dambeeya ee baddalka sanadlaha ah si loo tixgaliyo. Kadib qorituurka, codsiyada baddal ee cusub ee imanaya dugsiyada iyo barnaamijyada qorituurka ku salaysan ayaa lagu gudbin karaa dalabka qoritaanka furan.
IV(10): Kadib wareegga qorituurka, dugsiyada iyo barnaamijyada qorituurka ku salaysan ee ay kuraastu ka bannaan yihiin waxay u furnaan doonaan baddal iyadoo loo marayo dalabka Qoritaanka Furan. Dalbadayaasha Qoritaanka Furan ee dugsiyada iyo barnaamijyada qorituurka ku salaysan ee aysan jirin meel ka bannaan waxa lagu dari doonaa liiska sugitaanka iyadoo laga duulayo doorbidyada iyo mudnaanta qorituurka.
VI (1): Qorituurka meesha qura laga maamulo wuxuu u soosaaraa liis sugitaan dugsi iyo barnaamij kasta oo qorituur ku salaysan oo dalbadayaashu ka badan yihiin kuraasta bannaan. Liiska sugitaanku wuxuu ku salaysan yahay mudnaanaha iyo doorbidyada oo uu kala mid yihiin qorituurka. Kadib qorituurka, dalbadayaasha Qoritaanka Furan waxa dhici karta in lagu daro

liiska sugitaanka haddii aysan hadda jirin meel ka bannaan fasalka ardayga ku habboon dugsiga la codsado. Muhiimad dheeraad ah waxa dhici karta in la siiyo dalbadayaasha Qoritaanka Furan ee leh duruufo gooni ah oo la xaqiijiyey.
VIII(1): Qoysku waxa laga yaabaa inuu rafcaan ka qaato go'aanka ETC si uu u diido codsi baddal ama darajada liiska sugitaanka qorituurka iyagoo gudbinaya waraaq sharraxaysa sababta rafcaanka iyo wixii macluumaad ama caddaymo dheeraad ah. Rafcaanka waxa loo qaadan karaa laba sababood: (a) Dugsiga ama ETC oo ku fashilanta ku dhaqanka habraacyada baddalka ee dejisan, ama (b) Macluumaad cusub oo muhiim ah oo la xiriira duruufaha goonida ah oo la helo.